

Isqaadsiinta cudurka oo mar kale ku kordhaya Iswidhen-Waa muhiim in sharciga la raaco

Hadda waxaa sare u kacaya isqaadsiinta cudurka qaybo badan oo ka mid ah waddamada yurub ku yaal , oo ay ka mid tahay Iswiidhan. Laakiin gobolka Kalmar illaa iyo hadda waa uu fiicanyahay. Si' looga hortago dhibaataada cudurkan, waa in aan foajignaanaa.

Gobolka Kalmar cudurku wuu ku yaryahay marka loo eego gobollada kale ee dalka. Laakiin si dhaqso ah ayey arrintu isu bedeli kartaa.

”Haddii qof qoyska ka mid ah laga helo cudurka karoona (covid-19)qoyska intiisa kale waa in ay joogaan guriga” Sidaana waxaa yiri Lisa Labbe Sandelin, oo ah dhakhtarka cudurada faafa ee gobolka.” Horena waxaa sidaa u yiri hay'adda caafimaadka ee waddanka. Haddii loo baahdo oo ay lagamamaarmaan noqoto, waxaa lagu soo rogi karaa sharci adag gobolka oo dhan ama qayb ka mid ah gobolka.” Waana wixii ka billowda 19-kabisha oktoobar.

Haddii cudurku bilaabo inuu markale ku faafo gobolka, waxa ay hay'adda caafimaadka ee waddanka iyo dhakhaatiirta cudurrada faafa ee gobolka qaadan doona

go'aanno u gaar ah gobolka si wadajir ah. Go'aannadu waxa ay isugu jiri karaan siyaabo kala duwan.

Tusaale ahaan waxaa ka mid noqon kara in aan safar la' aadin ama aan lasoo booqan dadka cudurkan u jilicsan. Ama in aan la booqan makhaayadaha, goobaha jimicsiga iyo meelaha kale ee lagu kulmo.

Waxaa kale oo soo bixi kara sharci oranaya, waxaa keliya oo lala kulmi karaa dadka lala degan yahay oo keliya.

Sharciyadu wey kala duwanaa karaan iyda oo taa loo eegayo hadba faa fitaanka cudurka.

Waa in aynu dulqaad u yeelanaa, baranaana si yaabo kala duwan oo aan isaga difaacno cudurkan”Cudurkaan karoona raad dheer buu ku yeelan doonaa bulshada.

Isxakameyn baa jiri doonta ugu yaraan muddo sannad ah”

Sidaana waxaa yiri Johan Carlsson oo ah mas'uulka ugu sareeya hay'adda caafimaadka dalka.

Hay'adda caafimaadka: Ku saabsan cudurka Covid-19 oo luuqado kala duwan ah.



Ku toosi/beeg mobilkaada kaamiradiisa kodka. Markaa waxaad geleysa bogga warbixinada ee hay'adda caafimaadka.

